Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

# Ogolaanshaha Release of Information (Siidaynta Macluumaadka)

**Ogaysiis kusocda Macamiisha:** Markaad saxeexdo foomkan, waxaad ogolaansho siinaysaa DCYF iyo wakaaladaha iyo shaqsiyaadka ku liistaysan xagan hoose inay isticmaalaan oo ay kula wadaagaan macluumaadka muhiimka kuu ah. DCYF kuuma diidi karto kababka haddii aanad saxeexin foomkan haddii kale ogolaanshahaaga ayaa loo baahan yahay si loo go'aamiyo ku haboonaanshaha. Haddii aanad saxeexin foomkan, DCYF waxay wali kula wadaagi kartaa macluumaadka kugu saabsan ilaa xad inta sharcigu kuu ogolyahay. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan sida DCYF u wadaagto macluumaadka qarsoodiga ah ee macmiilka ama xuquuqdaada khaaska ah, fadlan la tasho DCYF Ogeysiiska Hawlaha Qarsoonnimada ama weydii qofka foomkan ku siinaya.

## Qaybta 1: Aqoonsiga Macmiilka

| MAGACA | TAARIIKHDA DHALASHADA | LAMBARKA AQOONSIGA | LAMBARKA TELEEFANKA |
|---|---|---|---|
| CINWAANKA | MAGAALADA | GOBOLKA | ZIP-KA |

MACLUUMAAD KALE:

## Qaybta 2: Ogolaanshaha

Waxaan ogolaaday in la isticmaalo oo lagu lifaaqo macluumaadka muhiimka ah ee igu saabsan iyadoo loo marayo DCYF iyo kuwa hoos ku taxan si aan ugala shaqayno adeegyada, daawaynta, lacag bixinaha, iyo kababka aniga i khuseeya ama ujeedooyinka kale ee uu sharcigu ogolaaday. Macluumaadka waxa lagula wadaag karaa hab qoraal ah ama hadal ah.

**Fadlan sax dhammaan kuwan hoose kuwa ku jira oggolaanshahan marka lagu daro DCYF oo aqoonso cinwaankooda iyo magacooda:**

| | |
|---|---|
| ☐ | Bixiyaasha Daryeelka Caafimaad: |
| ☐ | Bixiyaasha Daryeelka Caafimaadka Maskaxda: |
| ☐ | Bixiyaasha Adeega Isticmaalka Walaxda: |
| ☐ | Qaybaha: |
| ☐ | Dugsiyada Degmooyinka ama Koolajyada: |
| ☐ | Social Security Administration (Maamulka Adeega Bulshada) ama Wakaaladaha kale ee Fadaraalka: |
| ☐ | Eeg Liiska Ku Lifaaqan |
| ☐ | Kuwo kale (*oo ay kujiraan bixiyaasha qandaraasyada DCYF ama wakaaladaha kale ee gobolka):* |

**Waxaan awood u siiyay oo aan u ogolaaday inay la wadaagaan diwaanadan soo socda iyo macluumaadka (hubi dhamaan kuwa ku haboon):**

- ☐ Dhamaan diwaanka macmiilka
- ☐ Diwaanada ku lifaaqan liiska
- ☐ Kaliya diwaanadan soo socda
- ☐ Macluumaadka daryeelka caafimaad
- ☐ Daawaynta ama qorshaha daryeelka
- ☐ Hantida shaqsiyaadka
- ☐ Diwaanada lacag bixinta
- ☐ Taariikhda shaqaalaysiinta qoyska, bulshada
- ☐ Dugsiga, waxbarashada iyo tababarka
- ☐ Kuwo kale _____

Haddii diwaanka macmiilkaaga ay kujiraan mid kamid ah macluumaadkan soo socda, waa inaad sidoo kale dhamaystirtaa qaybtan oo ay kujiraan diwaanadan.

☐ Caafimaadka Maskaxda ☐ Natiijada kasoo baxday baadhista fayraska kujira dhiiga
☐ Adeegyda Substance Use Disorder (Isticmaal Xumida Daawooyinka) (SUD)

## Qaybta 3: Saxeexyada

Ogolaanshahan wuxuu shaqaynayaa ☐ hal sano ☐ ilaa iyo inta ay DCYF u baahan tahay diiwaanada, ama ☐ ilaa __________(*taariikhda ama dhacdada).*

- Waxa laga yaabaa inaan ka noqdo ama la baxo ogolaanshahan wakhti kasta qoraal ahaan, laakiin taasi ma saamayn doonto wax macluumaad ah oo hore loo wadaagay.
- Waxaan fahamsanahay in diiwaanada lagu wadaago ogolaanshahan laga yaabo inaan mar dambe lagu ilaalin sharciyada khuseeya DCYF.
- Nuqul ka mid ah foomkan waa mid ansax ah si aan u oggolaado inaan lawadaago diiwaannada.

| | | | |
|---|---|---|---|
| Saxeexa | Taariikhda | Meesha lagala xidhiidhayo Wakaalada/Saxeexa Makhraatiga | Taariikhda |
| Waalidka/Masuulka ama Saxeexa Kale ee Wakiilka (*haddii ay ku haboon tahay)* | Taariikhda | Telefoonka Waalidka/Masuulka ama Wakiillka Kale ee Matalaya *(haddii ay ku haboon tahay)* | |

Haddii aanan ujeedin diwaanada, waxaan ogolaaday inaan saxeexo sababtoo (*waxaan haystaa cadaynta lifaaqa ogolaanshaha):*
☐ Waalid ☐ Masuul Sharci (*ku lifaaq amarka maxkamada*) ☐ Wakiilka shaqsiga ah ☐ Kuwo kale__________

Ogeysiinta qaataha macluumaadka: Haddii diiwaanadan ay ka kooban yihiin macluumaadka ku saabsan fayraska dhiigga raaca, waxaa laga yaabaa inaadan ku lifaaqin macluumaadkaas iyada oo aan rukhsad gaar ah laga helin macmiilka. Haddii aad heshay macluumaadka la xidhiidha daawada ama alkahoosha uu sida qaldan u isticmaalay macmiilku, waa inaad ku jirtaa bayaanka soo socda marka lifaaq dheeraad ah ay u baahdaan 42 CFR 2.32: **"Macluumaadkan waxaa lagugu lifaaqa diiwaannada lagu ilaaliyo sharciyada sirta dowladda (42 CFR qaybta 2). Xeerarka federaalku waxay kaa mamnuucayaan inaad samayso lifaaq kale oo dheeri ah oo macluumaadkan ah ilaa lifaaqa dheeraadka ah si cad loogu ogolayn ogolaanshaha qoran ee qofka ay khusayso ama haddii kale ay ogolaato 42 CFR qaybta 2. Oggolaanshaha guud ee lifaaqa caafimaad ama kuwo kale macluumaad kuma filna ujeedadan. Sharciyada fadaraalku waxay xanibayaan isticmaal kasta oo macluumaadka dambi ahaan loo baadhayo ama xukunka alkahool kasta ama bukaanka si qaldan u isticmaala daawada."**

### TILMAAMAHA DHAMAYSTIRKA FOOMKA OGOLAANSHAHA

**Ujeedada:** U isticmaal foomkan markaad u baahato ogolaansho isticmaalka macluumaadka sirta ah ama sii wadida iyadoo lagu salaynayo macmiilka DCYF ama lagu lifaaqayo macluumaadka wakaaladaha kale si layskugu xidho adeegyada ama daawaynta, lacag bixinta ama halwaha wakaaladaha ama ujeedooyinka kale ee uu aqoonsanyahay sharcigu. Macamiishu waa shaqsiyaadka helaya kababka ama adeegyada ay bixiso DCYF.

**Isticmaal:** U buuxi foomkan si elaktaroonig ah haddii ay suurogal tahay inaad si fudud u akhriyi karto, **foom ka duwan waa inuu dhamaystiraa qof walba, oo ay ku jiraan caruurtu.** "Adiga" ee tilmaamaha ku jira waxaa loola jeedaa shaqaalaha DCYF iyo "adiga" foomka ku yaal waxa loola jeedaa macmiilka. Wadaagista diwaanada waxa kujira isticmaalka iyo lifaaqa macluumaadka sirta ah ee ku saabsan macmiilka.

**Qaybaha Foomka:**

<u>AQOONSIGA</u>:

- <u>Magaca</u>: Sii magaca hal macmiil foom kasta. Oo ay kujiraan magacyadii hore ee laga yaabo in macmiilku isticmaalay markuu helayay adeegyada.
- <u>Taariikhda Dhalashada</u>: Waxa looga baahan yahay in lagaga aqoonsado macmiilka shaqsiyaadka kale ee ay isku magaca yihiin.
- <u>Lambarka Aqoonsiga</u>: Sii lambarka aqoonsiga macmiilka ama aqoonsi kale sida social security number (lambarka adeega bulshada) (aan loo baahnayn) si uu kaaga caawiyo aqoonsiga diiwaanada iyo raadraaca taariikhda iyo adeegyada la helay.
- <u>Cinwaanka iyo telefoonka</u>: Macluumaad dheeri ah oo kaa caawin doona helitaanka iyo aqoonsiga ama la xidhiidhida macmiilka.
- <u>Kuwo kale</u>: Ku dar sanduuqan wixii macluumaad dheeraad ah oo kaa caawin kara helitaanka diiwaanada ay ku jiraan qaybo ka mid ah DCYF ee ku lug leh adeegyada, magacyada xubnaha qoyska, ama macluumaadka kale ee khuseeya.

<u>OGOLAANSHAHA (AWOODSIINTA)</u>:

- <u>Wakaaladaha ama shaqsiyaadka badalanaya diwaanada</u>: Buuxinta macmiilka ee foomkan ayaa u oggolaanaysa isticmaalka iyo wadaagga macluumaadka sirta ah dhammaan DCYF. DCYF waxay awood u yeelan doontaa inay ku lifaaqdo oo ay hesho macluumaadka qarsoodiga ah ee ka imanaya wakaladaha dibada ama shaqsiyaadka liistaysan. Sii macluumaadka aqoonsiga ee ku saabsan wakaaladaha ama bixiyeyaasha, oo ay ku jiraan magaca, cinwaanka ama goobta haddii ay suurtagal tahay. Waxa kale oo aad ku soo lifaaqi kartaa liiska wakaaladaha loo oggol yahay inay wadaagaan macluumaadka kaas oo macmiilku waajib ku yahay inuu saxeexo.
- <u>Macluumaadka waxa kujira:</u> Macaamiishu waa inay caddeeyaan waxa uu yahay diwaaanka uu daboolayo ogolaanshaha. Macaamiisha waxaa laga yaabaa inay sameeyaan dhammaan diiwaanada la heli karo ama waxay xaddidi karaan diiwaanada ku jira taariikhda, nooca ama isha diiwaanka. Haddii macmiilku aanu saxeexin ogolaanshaha ama aanu cayimin diiwaan gaar ah, wadaagista diiwaankaas wali waa la ogolaan doonaa haddii sharcigu ogolaado. Waxaad ku soo lifaaqi kartaa liiska diiwaanada la daboolay ee uu macmiilku sidoo kale saxeexo. Haddii diwaan kasta oo ay kujiraan macluumaadka la xidhiidha caafimaadka maskaxda (RCW 71.34.500, 71.34.510 & 71.34.530), HIV/AIDS ama baadhista STD ama daawaynta (RCW 70.02.220), ama adeegyada alkahoosha ama daroogada (42 CFR 2.31(a)(5)), macmiilku waa inuu si gaar ah u calaamadiyaa meelahan si uu u ogolaado inuu wadaago diiwaanadan. Foomkan ma ansaxayo in lagu daro qoraalada daawaynta cilmi-nafsiga ee hoos yimaada 45 CFR 164.508(b)(3)(ii) waana in foom gooni ah la buuxiyaa si loogu daro diiwaanadaas.
- <u>Mudada:</u> Oo ay kujiraan taariikhda dhicitaanka ogolaanshaha kaasoo u adeegaya ujeedooyinka barnaamijkaaga ama sida uu siiyay sharcigu.
- <u>Fahamka:</u> Hubi in macmiilku fahmay ogolaanshaha la siinayo iyo sida iyo sababta macluumaadka loo wadaagayo. Haddii loo baahdo, isticmaal foom la turjumay iyo turjumaan ama kor u akhri foomka. Haddii macmiilku u baahan yahay macluumaad dheeraad ah, sii koobi dheeraad ah oo ah Ogeysiiska Hawlaha Qarsoonida ee DCYF ama u gudbi macmiilka sarkaalka lifaaqa dadweynaha ee qaybtaada

<u>SAXEEXYADA</u>:

- <u>Macmiilka:</u> Haysta macmiil ama ilmo ka weyn da'da ogolaanshaha (13 loogu talagalay caafimaadka maskaxda iyo adeegyada daroogada iyo khamriga; 14 ee HIV/AIDS iyo STD-yada kale; da' kasta oo loogu talagalay xakameynta dhalmada iyo ilmo iska soo rididda; 18 daryeelka caafimaadka iyo diiwaannada kale) saxiix sanduuqan oo geli taariikhda saxiixa. Macmiilku waxa laga yaabaa inuu ku beddelo calaamad sanduuqan ku jira oo aad markhaati ka tahay.
- <u>Meesha lagala xidhiidhayo Wakaalada ama Makhraatiga:</u> Waxaad ku saxeexi doontaa sanduuqan haddii aad tahay qofka u soo bandhigaya oo u sharaxaya foomka macmiilka. Fadlan hakujiro lambarka telefoonkaaga. Haddii macmiilku foomamka ku saxeexayo meel ka baxsan goob ganacsi, u sheeg macmiilka inuu ku haysto calaamada markhaatiga qaybtan oo sii lambar telefoon. Nootaayo sharci ah ayaa noqon karta makhraati saxeexa macmiilka.

<u>Waalidka ama Wakiilada Kale:</u> Haddii macmiilku yahay ilmo ka yar da'da ogolaanshaha, waalidka ama masuulka waa inuu saxeexaa. Haddii ilmuhu aanu buuxin da'da oggolaanshaha dhammaan xogta la wadaagayo, ilmaha iyo waalidkuba waa inay saxeexaan. Haddii macmiilka lagu caddeeyo in aanu si sharci ah u shaqaynayn, masuulka ay maxakamadu magacaawday waa in uu saxeexaa oo keenaa nuqulka amarka ballanta. Haddii qof uu u saxeexo qaab awood kale kujirto (ay ku jiraan qof leh awoodda qareenka ama wakiilka guryaha), calaamadee "kuwo kale" oo hel nuqul ka mid ah awoodda sharciga ah ee lagu dhaqmo. Qofka saxeexaya waa in uu taariikhda saxeexa ku qoro oo uu siiyaa lambar telefoon ama macluumaadka xidhiidhka.